# JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA SHACABKA

## QARAAR KU SAABSAN

## DHAARINTA IYO DEEQAHA UU XAQ U YEELANAYO MADAXWEYNIHII 9AAD EE SOOMAALIYA MUDANE MAXAMED CABDULLAHI MAXAMED FARMAAJO

Muqdisho, Agoosto 21, 2022

Tix: GSH/B11/004/22
Kalfadhiga: 1aad
Kulankiisa: 15aad

**Taariikh:** Agoosto 21, 2022

## GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

**Markuu Arkay:** Qodobka 89aad ee Dastuurka Federaalka;

**Markuu Arkay:** Cutubka 3aad Xeer-Hoosaadka u gaar ah doorashooyinka Gudoomiyeyaasha Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo Doorashada Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Qodobka 66aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;

**Markuu Arkay:** Natiijada lagu soo gunaanaday Geeddisocodka doorashadii Madaxweynaha 10aad ee Jumhuuriyadda Soomaaliya oo la qabtay 15kii Maajo 2022.

**Markuu Arkay:** Warbixinta Guddiga Baarlamaanka JFS uga xilsaaran Doorashada Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Asaga oo ku Kulansan:** Kalfadhiga 1aad Kulankiisa 15aad ee Agoosto 21, 2022

## GOLAHA SHACABKA BAARLAMAANKA 11AAD EE SOOMAALIYA WUXUU XEERIYEY QARAARKAN

### Qodobka 1aad:

Golaha Shacabka Baarlamaanka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu si maamuus leh u soo dhoweynayaa Madaxweynihii 9aad ee JFS Mudane Maxamed Cabdullahi Maxamed Farmaajo oo muddada xilhayntii loo doortay si buuxda u soo dhamaystiray xilkana banneeyey 15kii Maajo 2022.

### Qodobka 2aad:

M.ne Maxamed Cabdullahi Maxamed Farmaajo wuxuu noqonayaa xildhibaan Golaha Shacabka Soomaaliya inta uu nool yahay xilkana loo dhaariyey Agoosto 21, 2022 si waafaqsan Qodobka 64(4) ee Dastuurka Federaalka. Saa daraadeed tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka waa Laba Boqol Toddobaatan iyo Todoba (277) Xildhibaan.

### Qodobka 3aad:

Madaxweynihii 9aad ee Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullahi Maxamed Farmaajo wuxuu yeelanayaa gunno bileed iyo deeqaha kale uu maamuus ahaan xaq u leeyahay.

Tix: GSH/B11/004/22
Kalfadhiga: 1aad
Kulankiisa: 15aad

**Taariikh:** Agoosto 21, 2022

**Qodobka 4aad:**

Qaraarkani wuxuu hirgelayaa marka uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad ee Soomaaliya waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.

**M.ne Sheikh Adan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS**